

Ma u baahan tahay taageero dheeraad ah si aad dugsiga uga gudubto ama aad u gasho marxalada shaqada? Markaa SKRUVAS waxay noqon kartaa jidka loo maro!

### Kuwa da'doodu u dhaxayso 13–17

Adiga aadaya dugsiga sare waxa aad taageero dheeraad ah ka heli kartaa iskuduwaha iyo/ama SYV dugsiga ka hor iyo inta lagu jiro dugsiga sare. Inta lagu jiro sanadka 9, waxaad baraneysaa qof xiriiriyeho ah oo jooga dugsiga sare oo kula shaqeeyaa adiga iyo SYV si loo hubiyo si aad taageero fiican uga hesho waxbarashadaada sii socota. Hadafku waa inaad dareento amaan markaad dugsiga hoose dhameysato oo aad bilowdo dugsiga sare.

### Kuwa da'doodu u dhaxayso 18–24

SKRUVAS, isku-duwayaasha mashruuca waxay la shaqeeyaan isku-duwaha KAA (mas'uuliyadda waxqabdarka degmada) iyo shaqaalaha dugsiga. Waaad helaysaa isku-duwe kuu gaara kaas oo ku siinaya taageero si aad ugu gudubto dugsiga sare una gudubto waxbarasho ama marxalada shaqda. Hadafka ayaa ah inaad dareento kalsooni mustaqbalka markaad dhammayso dugsiga sare.

#### SKRUVAS waxaad kartaa inaad:

- ka hesho caawin khariidaynta/darasadaynta fursadahaaga iyo meelaha aad ku fican tahay
- sahamiso danahaaga iyo rabitaankaaga
- taageero ka hesho waxbarashadaada
- caawimo hesho si aad u raadsato shaqo ama goob shaqo barasho (praktikplats)



Medfinansieras av  
Europeiska unionen

SKRUVAS waa mashruuc ay maalgeliso sanduuqa bulshada ee Yurub waxaana iska leh degmada Växjö. Mashruuca waxaa la sii mariyaa qaybta mashruuca Kronoberg waxaana lag fuliyaa Alvesta, Lessebo, Ljungby, Uppvidinge, Tingsryd, Växjö, Markaryd iyo degmada Älmhult.

## **Su'aalo**

Haddii aad hayso su'aalo, waxaad ku soo diri kartaa  
emailkan: projektenhetkronoberg@vaxjo.se

## **Tani waa SKRUVAS**

Mashruuca SKRUVAS wuxuu ku siin doonaa taageero qoto-dheer sidoo kale wuxuu horumarin doonaa hababka la xoojiyey ee KAA (mas'uuliyadda waxqabad ee degmooyinka) ee horeba uga soo bilaabmayay fasallada 7-9 iyo ka dib dugsiga sare.

## **Yaa ka qayb qaadan kara SKRUVAS?**

SKRUVAS waxay wax la qabataa dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 13-24 ee u baahan taageero shakhsiyeed oo isku dubaridan marka ay u gudbaan marxaladaha dugsiga iyo ka soo noqoshada dugsiga ilaa marxalada shaqada.

### **Sidee u dhacdaa?**

SKRUVAS, KAA iyo isuduwayaasha dhalinyaradu waxay si dhow ula shaqeeyaan dugsiyada hoose iyo sare si loo aqoonsado da'yarta u baahan taageero la isku duba riday goor hore.

Lakulanka isku-duwaha dhalinyaradu meelaha loo sii mari karo waxa ka mida KAA, kaalmada dhaqaalha/cayrta iyo dugsiga sare.



Alvesta  
kommun



Lessebo  
kommun



Ljungby  
Kommun



MARKARYDS  
KOMMUN



UPPVIDINGE  
KOMMUN



Tingsryds  
kommun



Växjö  
kommun



Älmhults  
kommun